**Warmurtiyeedka Kulanaka Wasiirrada Maaliyadda Dowladda Federaalka, Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka iyo Maamulka Gobolka Banaadir**
**Kulanka 24-aad**

**Taariikh:** 16 February 2026
**Goobta:** Hotel Amara, Muqdisho

## Arar

Kulan ay isugu yimaadeen Wasiirrada Maaliyadda Dalka ee uu hoggaaminaayo Wasiirka Maaliyadda Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS), ayna ka soo qayb-galeen Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka (DXDFS) iyo Maamulka Gobolka Banaadir (MGB) ayaa si guul ah uga gabo-gaboobay Hotel Amara ee magaalada Muqdisho. Shirkaan oo socday muddo laba maalmood ah (15-16-ka February 2026), ayaa diiradda lagu saaray arrimo hortabin u leh hagaajinta hab nidaamka maamul-maaliyadeed iyo midaynta dadaallada wada-shaqayneed ee labada heer dowladeed.

Kulanka waxaa si rasmi ah u furay una shir-guddoomiyey Wasiirka Maaliyadda Dowladda Federaalka Soomaaliya, iyadoo ay goobjoog ka ahaayeen Wasiiru Dawlaha Wasaaradda Maaliyadda DFS, Wasiirrada Maaliyadda Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka, Guddoomiye ku-xigeenka Maamulka iyo Maaliyadda ee Gobolka Banaadir, xubno Guddiga Farsamada (IGFFTC) ee uu horkacayay Guddoomiyaha Guddiga, Isu-duwaha Mashruuca RCRF iyo Xoghaynta Guud ee IGFFTC.

Kulanku wuxuu bogaadiyey muhiimadda iskaashi joogta ah ee labada heer Dowladeed, isagoo hoosta ka xarriiqay in sii xoojinta wada-shaqaynta ay lama huraan u tahay hirgelinta heshiisyadii hore loogu gaaray iyo guud ahaan kuwa hortabinta u leh federaleynta maaliyadda ee dalka.

Sidoo kale, kulanku wuxuu mar kale dib u adkeeyey mowqifkiisa ku aaddan xaqiijinta midnimada dalka, iyo hirgelinta isla-xisaabtan ku dhisan kalsooni iyo is-qancin.

Goluhu wuxuu soo dhoweeyey kasoo qaybgalka shirka ee Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari Soomaaliya. Mar kale Goluhu wuxuu isla qaatay mudnaanta ay leedahay in Dawlad Goboleedka Waqooyi Bari iyo Maamulka Gobalka Banadir ay ka mid noqdaan ka faa'idaysiga dhammaan mashaariicda iyo barnaamijyada horumarineed ee ka socda Dalka.

Intii uu kulanku socday, ajandaha kulanka ayaa ahaa sidan soo socota:

1. Wax-ka-beddelka Heshiiskii Wadaagga Deeqdaha ee Febraayo 2023 (Fiscal Transfer Grant Agreement)
2. Warbixin la xiriirta sida loo midayn lahaa Canshuurta Iibka (Sales Tax) ee DXDFS iyo MGB.

3. Ansixinta Qormo Siyaasadeed ee Guddiga Farsamada IGFF: Hirgelinta Heshiiskii NCC 2023 ee Qoondaynta Awoodaha Dakhliga (DFS iyo DXDF)
4. Ka doodista qorshaha joogtaynta shaqaalaha rayidka DXDFS

**Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Heshiiskii hore ee Wadaagga Deeqdaha ee Febraayo 2023**

Kulanka ayaa ka dooday wax-ka-beddelka Heshiiskii Wadaagga Deeqaha ee la gaaray Febraayo 2023, isagoo dib u eegis ku sameeyey hirgelinta qaacidadii lagu heshiiyey saddexdii sano ee la soo dhaafay. Kulanku wuxuu bogaadiyey sida hufan ee loogu soo dhaqmay Qaacidadii Wadaagga Deeqaha muddadaas, isagoo ku tilmaamay in maamulladu ku tababarteen adeegsigeeda, taas oo noqotay waayo-aragnimo laga dhaxlay dadaaladii wada shaqeyneed, xoojisayna kalsoonida iyo iskaashiga u dhaxaysa heerarka kala duwan ee hey'adaha maaliyadda dalka.

Kulanku wuxuu ansixiyey dhammaan soo jeedintii Guddiga Farsamada IGFFTC ee ku saabsanaa wax-ka-beddelka halbeegyo-hoosaadka(sub-indicators) qaybaha la isku qeymeynayo waxqabadka ee qaacidada, si loo kordhiyo hufnaanta, isla-xisaabtanka iyo dhiirrigelinta horumarinta maaliyadeed.

Sidoo kale, kulanku wuxuu wax-ka-beddel ku sameeyey boqolleyda qaar ka mid ah halbeegyadii lagu heshiiyey Febraayo 2023, ayadoo loo eegayo culeyska halbeegyada iyo waxqabadyadooda iyo muhimadda ay u leedahay horumarinta maamulka maaliyadda dalka.

Ugu dambeyntii, wax-ka-beddelka lagu sameeyey heshiiskii hore ee qaacidadu wuxuu ku meel maray qaab wadar oggol ah, iyadoo la isla qaatay in halbeegyada boqolleydooda la beddelay lagu dabaqo wadaagga deeqaha, heshiiskana dib u eegis lagu sameeyn doono laba sano ka dib ama xiligii goluhu soo jeediyo wax-ka-beddelkiisa.

| Parameter (Halbeeg) | Percentage (%) 2023 | Percentage (%), 2026 |
|---|---|---|
| Equal share | 57 | 25 |
| Promoting Fiscal Federalism | 0 | 20 |
| Fiscal Gap Equalization | 3 | 3 |
| Revenue Enhancement | 15 | 20 |
| Expenditure Management | 15 | 17 |
| Reporting and Auditing | 10 | 15 |

Shirku wuxuu si wada oggol ah isugu raacay in isbeddel lagu sameeyo qaacidada iyo jaangoynta boqolleyda, laguna dhaqangaliyo sida soo socota.

- In wadaagga siman (equal share) la yareeyo lagana dhigo 25%, iyadoo laga guurayo heerkii hore ee 57%, laga bilaabo hadda iyo ilaa isbeddel kale lagu sameeyo.
- Shirku wuxuu isku raacay in la soo kordhiyo halbeeg cusub oo lagu xoojinayo wada shaqaynta Wasiirrada Maaliyadda, si loo dardar galiyo hanaanka federaaleynta Maaliyadda dalka iyada oo la isku xirayo wadaagga deeqaha iyo socodsiinta shirarka heerarka kala duwan ee federaaleynta Maaliyadda iyo fulinta qodobada laga heshiiyo ee lagu hormarinayo hanaanka Maaliyadda dalka iyo mideynta dakhliga si dalka ku gaaro isku filnaan maaliyadeed, halbeegaas ayaa 20% loo qoondeeyay dhiirigalinta hirgalinta hanaanka federaaleynta maaliyadda. Qaabka hubinta waxaa lagu faahfaahiyay lifaaq gaar ah oo fasiraya qodobkaan.

**3) Ansixinta hirgelinta Qormo Siyaasadeedka heshiiskii Astaynta Awoodaha Dakhliga ee Madasha NCC (Revenue Assignment Agreement)**

Kulanka ayaa si qoto-dheer uga dooday Qormada Siyaasadeedka Astaynta Awoodaha Dakhliga, taas oo ku saleysan heshiiskii ay hore u gaareen Madaxda Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka (DXDFS) ee ku saabsanaa qeexidda iyo Astaynta Awoodaha Dakhliga.

Kulanku wuxuu bogaadiyey dadaalka Guddiga Farsamada IGFFTC ee diyaarinta Qormada, iyagoo taageero farsamo ka helay Bankiga Adduunka iyo Machadka IFF ee Jaamacadda Fribourg, halka Dowladda Switzerland ay ka geysatay taageero maaliyadeed iyo tababaro farsamo.

Kulanku wuxuu si rasmi ah ugu mahadceliyey dhammaan dhinacyadii ka qeyb qaatay diyaarinta Qormada, isagoo muujiyey in dukumeentigu yahay mid xoojinaya hannaanka federaaleynta maaliyadda iyo wada-shaqeynta heerarka kala duwan ee dowladda.

Ugu dambeyntii, kulanku wuxuu ku qancay dhammaan soo jeedimaha ku xusan Qormada Siyaasadeedka, wuxuuna ku ansixiyeen si wada jir ah.

**4) Casriyaynta Mushaharaad bixinta Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka**

Shirku wuxuu ka dooday horumarka Mashruuca RCRF, iyadoo si gaar ah diiradda loo saaray arrimaha la xiriira dib-u-habynta mushahar bixinta shaqaalaha rayidka ah ee Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka Soomaaliya (DXDFS). Waxaa hoosta laga xariiqaya ahmiyadda ay leedahay sii wadista kaalmada Mashruuca, madaama ay jirto baahi ah in DXDFS laga caawiyo mushaar bixinta shaqaalaha.

Shirku wuxuu u mahadceliyey Bankiga Adduunka oo muddo dheer taageerayey bixinta mushaharka shaqaalaha rayidka ah, isagoo carrabka ku adkeeyey muhiimadda ay leedahay sii wadidda mushahar-siinta shaqaalaha DXDFS.

Si arrinkan loo xoojiyo, shirku wuxuu isla qaatay in is beddel dhab ah lagu sameeyo nidaam maamul-maaliyadeedka mushahar bixinta shaqaalaha DXDFS si loo xoojiyo daahfurnaanta maamulka maaliyadda Dowladda, si sare loogu qaado kalsoonida shacabka.

Ugu dambeyn, shirku wuxuu xoojiyey baahida loo qabo in la helo maalgelin joogto ah oo horseedi karta isku filnaansho, ayna ka mid tahay kobcinta dakhliga gudaha iyo adkaynta maamulka maaliyadda si loo hubiyo in adeegyada asaasiga ah aysan hakad gelin.

**Gunaanad**

Madasha Wasiirrada Maaliyadda Dowladda Federaalka, Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka iyo Maamulka Gobolka Banaadir waxay mar kale adkeeyeen sida ay uga go'an tahay xoojinta wada-shaqeynta maaliyadeed, ka fogaanshaha siyaasadaynta wada shaqaynta, fulinta iyo hirgelinta heshiisyada la gaaray iyo dardargelinta dib-u-habeynta maaliyadda dalka, si loo gaaro horumar waara iyo koboc dhaqaale oo loo dhan yahay.

**Wabillaahi Towfiiq**

**Saxiixayaasha Warmurtiyeedka Shirka**

1. Ciise Maxamuud Guure, Guddomiye Kuxigeenka Maamulka iyo Maaliyadda Gobolka Banaadir ____________
2. Maxamed Faarax Maxamuud, Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Puntland ____________
3. Sen. Farxaan Cali Maxamuud, Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Galmudug ____________
4. Axmed Cabdirisaaq Maxamed, Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Jubbaland ____________
5. Cabdullaahi Maxamed Aadan, Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Maaliyadda Koonfur Galbeed ____________
6. Cabdiraxiim Ciise Caddow, Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Hirshabeelle ____________
7. Cabdiqani Xuseen Xaaji Hiirad, Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Waqooyi Bari ____________

____________

**Xildh. Biixi Iimaan Cige**
**Wasiirka Maaliyadda DFS**